Taxadirka Aysoleeshinka ee Bukaanka Waayeelka ah

(Isolation Precautions for Adult Patients)

Taxadirka Isku Dhawaanshaha iyo Aysoleeshinka Candhuufta Kasoo Duulaysa

(Contact and Droplet Isolation Precautions)

Waa maxay taxadirka isku dhawaanshaha iyo candhuufta qofka kasoo duulaysaayi?

(What are contact and droplet precautions?)

Taxadirka isku dhawaanshaha iyo candhuufta qofka kasoo duulaysaayi waa talaalooyin booqashadayaasha xarunta daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha looga baahan yahay inay raacaan marka ay galayaan ama ka baxayaan qolka bukaanka. Waxa ay joojinayaan in jeermiska faafo si dadka kale ayna u xanuunsan. Taxadirka isku dhawaanshaha iyo candhuufta qofka kasoo duulaysaayi waxaa loogu talo geley dadka bukaanka ah ee qaba jeermis faafaya:

- iyada oo taabanaya bukaanka ama meelaha badanaa la taataabto ee qolkooba
- marka bukaanku qufaco ama hindhiso

Sidee ayaan ku ogaanaa hadii bukaanku uu qabo taxadirka isku dhawaanshaha iyo candhuufta qofka kasoo duulaysaayi?

(How do I know if a patient is on contact and droplet precautions?)

Waxaa jiri doona calaamad ku dhajisan albaabka. Waxay u sheegtaa booqdayaasha xarunta caafimaadka iyo shaqaalaha waxa loo baahan yahay inay sameeyaan kahor inta ayna gelin qolka bukaanka iyo marka ay ka baxayaan qolka.

Maxaa la samaynayaa kahor inta bukaanku la booqan ku jira taxadirka isku dhawaanshaha iyo candhuufta qofka kasoo duulaysaayi?

(What should I do before visiting a patient on contact and droplet precautions?)

Waxa aad kala hadashaa kaaliyaha caafimaadka kahor inta aanad booqan iyo kahor inta aanad caruur keenin. Waxaa dhici karta inay jirto xadidaad cida soo booqan karta.

Maxay tahay in aan sameeyo kahor inta aanan gelin qolka bukaanka?

(What should I do before I go into the patient's room?)

1. Farxalo Isticmaal sabuun iyo biyo ama gacme nadiifiye (alkohool ah).
2. Waxa aad gashataa mar dheer hadii aad caawinayso bukaan la daryeelayo (hadii aanad u baahnayn dhar dheer). Waxa aad kusoo xidhataa marada dheer qoorta iyo dhabarka.
3. Waxa aad xidhataa waji gashad. Waxa aad meesha soo kuusan waji gashadka gelisaa sankaaga. Waxa aad xadhiga kusoo laabtaa dhagahaaga ama si wanaagsan u xidho. Waybta hoose ee waji gashadku waa in gadhkaaga hoos maraa.
4. Waxa aad xidhataa muraayado - muraayadaha laguu qoraa ma ilaalin doonaan indhahaaha.
5. Waxa aad gashataa golofis hadii aad caawinayso bukaan la daryeelayo (hadii aanad u baahnayn golofis). Waxa aad hoos gelisaa golofiska gacanta golofiskaaga.
6. Soo gelida qolka bukaanka. Waa inuu albaabku kuu furnaadaa ama xidhnaadaa.

Maxay tahay in aan sameeyo kahor inta aanan ka bixin qolka bukaanka?

(What should I do when I leave the patient's room?)

Hadii aad booqanayso bukaan qaba shuban, ku farxalo **sabuun iyo biyo**, aan ahayn gacmo nadiifiye, marka aad ka baxayso qolkaaga.

Hadii aanad xidhnayn maro dheer iyo golofis, waxa aad bilawdaa 4 talaabo. Hadii aad xidhan tahay golofis iyo maro dheer:

1. Waxaad iska saartaa adiga oo qabanaya dhanka u dhaw dhaxdaada. Waxa aad ku ridaa golofiska qashinka qolka bukaanka yaala. Ha ku xidhan golofiska meel kale oo xarunta daryeelka caafimaadka ah.
2. Farxalo
3. Waxa aad ka furtaamarada dheer qoorta iyo dhabarka oo iska saar. Waxa aad ku ridaa marada dheer cabda qashinka qolka bukaanka yaala. Ha ku xidhan marada dheer meel kale oo xarunta daryeelka caafimaadka ah.
4. Farxalo
5. Ka bixida qolka bukaanka. Waxaad albaabku ku dayn kartaa furnaan ama xidhnaan.
6. Waxaad iska saartaa waji gashadka adiga oo isticmaalaya cinjirka ama inta aad xidho waxa aad ku ridaa qashinka. **Ha** taaban dhanka hore ee waji gashadka. Ha ku xidhan meel kale oo xarunta daryeelka caafimaadka ah.
7. Waxa aad iska saartaa muraayada oo waxa aad ku ridaa qashinka. Ha ku xidhan marada dheer meel kale oo xarunta daryeelka caafimaadka ah.
8. Farxalo mar kale.

Miyay bukaanku ku jira taxadirka isku dhawaanshaha iyo candhuufta qofka kasoo duulaysaayi ka bixi karaan qolka?

(Can a patient on contact and droplet precautions leave their room?)

Bukaanka ku jira taxadirka isku dhawaanshaha iyo candhuufta qofka kasoo duulaysaayi waxa uu ka bixi karaa qolkiisa kaliya hadii ay daruuri tahay (tusaale ahaan, si uu ugu baxo shaybaadh caafimaad). Waa inay xidhaan waji gashad mar kasta marka ay qolka banaankiisa joogaan.

Sidee kale ayaan u joojin karaa faafitaanka jeermiska?

(How else can I stop germs from spreading?)

- Ha booqan qof ku jira xarun caafimaad hadii aad qabto xumad, qufac, ama shuban.
- Ha booqan hadii aad hubto inaad u dhawaatay qof xanuun faafinaya (taasi waxay ka dhigan tahay xanuunada dadka kale qaadi karaa, sida hablo baasta ama duray).
- Isticmaalka suuliga dadka ka dhaxeeya ee xarunta daryeelka caafimaadka. Ha isticmaalin suuliga bukaanka.
- Kala hadal daryeelka caafimaad bixiyahaaga hadii aad su'aalo ka qabto sida loo joojinayo faafitaanka jeermiska.

Wixii talo kaaliya caafimaad iyo macluumaadka caafimaadka guud 24/7 kala hadal **Health Link** lambarka **811**.

Markii ugu dambeysay ee dib loo fiirshay: Febraaro 1, 2023
Qoraa: Infection Prevention and Control, Alberta Health Services

Qalabkani maaha mid lagu beddelayo talada xirfadle caafimaad oo aqoon leh. Qalabkan waxaa loogu talagalay macluumaadka guud oo keliya waxaana lagu bixiyaa 'sida uu yahay", "meesha uu" ku saleysan yahay. In kasta oo dadaallo macquul ah la sameeyay si loo xaqiijiyo saxnaanta macluumaadka, Alberta Health Services ma sameeyaan wax matalaad ah ama dammaanad ah, degdeg ah, si maldahan ama sharci ah, xagga saxnaanta, isku halaynta, dhammaystirnaanta, adeegsiga ama ku habboonaanta ujeeddo gaar ah ee macluumaadkan oo kale ah. Alberta Health Services waxay si cad u diidaysaa dhammaan masuuliyada isticmaalka agabkan, iyo sheegasho kasta, ficillo, dalabaad ama dacwado kasta oo ka dhasha isticmaalkan.